Oo isticmaalayaasha

Vinelle®

(desogestrel)

Kani waa Vinelle

Vinelle waa kaniiniga ka hortaga ee kaa illaaliyaa inaad uur yeelatid, lagu siiyay aad u isticmaashid si sax ah. Vinelle waxay wadataa tirooyin yar oo hoomoonka jinsiga dumarka, progestin desogestrel. Vinelle waxaa sidaas darteed loo yaqaan kaniiniga ka hotaga uurka kaliya- progestin. Kaniiniyada ka hortaga uurka la isku daray ee kala duwan, Vinelle ma wadato oestrogen.

Vinelle waxay uga hortagtaa uurka sida xigto:

- Ugxan sameynta ma dhacdo.
- Xabka ilmo galeenka wuxuu ahaadaa mid qafiif ah oo ma buuxiyo dhiig, taas oo micnaheeda ah in ukun aysan suurtogaleynin inay ku lifaaqanto.
- Dheecaanka ku jiro ilmo galeenka wuu adkaadaa,oo ku adkeynayo shahwada inay galaan.

Ka hor isticmaalida Vinelle:

- Si taxadar ah u aqri buug-yaraha baakida ee ku jirto baakida.
- La xiriir umulisadaada ama dhaqtarka haddii aad qabtid wax su'aalo ah.

Wareega caadadaada caadiga ah

Si markaas loo fahmo sida Vinelle u shaqeyso, sidoo kale waa muhiim garaneysid sida wareega caadadaada u shaqeyso. Hal jeer bishiiba ukun ayaa laga soo daayaa ugxantaada. Xabka ilmo galeenka ayaa diyaariyo nafsadeeda si ay u hesho ukunta iyada oo ka buuxineyso dhiig oo ad-kaaneyso si markaas ukunta, haddii ay bac-rinto, si ay u hesho nafaqo waxay u baahantahay inay ku korto uurjiifka. Haddii aan ugxantu bacrin-sanayn, waa la daadin doonaa kadib 14 maalmood ayadoo ay la socoto ugxan haysata ku jirta minka. Dhiiga markaas yimaada ayaa loogu yeeraa dhiiga caadada. Waqtiga caadiga a ee caadadu wuxuu socdaa 3-8 maal-mood. Dhammaan mudada mareegta dhiiga caadada, laga bilaabo marka dhiigu kaa yimaado ilaa xiliga xiga ee caadadu kugu dhacdo, badanaa waa 28 maalmood, laakiin wuu kala duwan yahay haweenka asagoo u dhex-eeya 21 ilaa 35 maalmood. Siidaynta ugxanta ayaa dhacda inta u dhexay-sa maalmaha12iyo16marka mareegtu tahay 28 maalmood.

Fiiro gaar ah!

Kaniiniyada ka hortaga uurka ma bixiyaan illaalada ka soo horjeedo cu-durada galmada laga qaado, marka waa inaad isticmaashaa kondhom sida illaalo dheeraad ah haddii aad la kulantid lamaane cusub.

Baakida Vinelle waxay wadataa 3 ama baakidaha kaiiniga oo ay la jiraan 28 kaniiniyo midkiiba. Maalmaha isbuuca waxaa lagu qoraa baakida kaniini walba.

Sida loo isticmaalo Vinelle

- Haddii aad qaadatid kaniiniga ugu horeeyo maalinta koowaad ee caadadaa-da, waxaa lagaa illaalinayaa uurka ka bilow maalinta koowaad. Waxaad sidoo kale ku bilaabi kartaa qaadashada Vinelle maalinta 2-5 ee wareega caadadaada, laakin waxaad kadib isticmaaleysaa qaabka ka hortaga uurka dheeraad ah (sida kondhomka) ee 7 maalmood ee ugu horeyso.
- Haddii aad bilwodid qaadashada Vinelle kadib dhalida ama haddii aad ku badeshid Vinelle ee ka hortaga uurka dhacaan ee kale, aqri warbixinta gelinta baakida.
- Si aad u gaartid illaalo buuxdo, waa inaad u qaadataa kaniiniyada si joogta ah qiyaastii isla waqtiga maalin walba. La wada qaado kaniiniga biyo yar.
- Horida baakida kaniiniga, waxaa jiro falaaro ku sawiran inta u dhaxeyso kaniiniyada. Gadaasha, maalmaha isbuuca waxay ku qorantahay foylka. Kaniini walba wuxuu waafaqsanyahay maalin isbuuca.

Haddii aad bilowdid Arbacada, tusaale ahaan, waa inaad ku bilowdaa kaniiniga ku calaameysan "O/K".

- Waqti walba aad bilowdid baakida kaniiniga cusub, waa inaad ka qaada-taa kaniiniga safka kore. Haddii, tusaale ahaan, aad bilowdid Arbacada, waa inaad ka qaadataa kaniiniga ku calaameysan Arbacada (ku ca-laameysan "O/K" ee baakida kaniiniga).
- Joogteynta qaadashada hal kaniini maalin walba illaa baakida ay ebar tahay, ee xigto jaheynta filaaraha ee marwalba. Saxitaanka gadaasha baakida, waxaad marwalba si sahlan u arkeysaa haddii aad marhore qaadatay kaniinigaaga ee maalinta.
- Waxaa laga yaabaa inaad qabtid dhiigbax marka aad isticmaaleysid Vinelle, laakin waa inaad sii wadaa inaad qaadatid kaniiniga sida caadiga ah.
- Markii baakida kaniiniga ay ebar tahay, ku bilow baakida cusub maalinta xigta, iyada oo aan jirin sugitaanka dhiigbaxa. Ku bilow baakida kaniiniga xiggo ee isla maalinta isbuuca sida baakida kaniiniga hore.

Kala hadal umulisadaada ama dhaqtarka haddii aad dareentid inaadan hubin waxna.

Su'aalaha inta badan **la isweydiiyo**

Ka waran haddii aan iloobo inaan kaniini qaato?

Wax ka yar 12 saacadood daahid ah:
U qaado kaniiniga ku dhaafay sida ugu dhaqsiha badan ee aad xasuusatid inaad sidaas sameysid, iyo ku qaado kaniiniga xiggo waqtiga caadiga ah. Waxaad kadib ku illaalsantahay uurka.

Wax ka badan 12 saacadood daahid ah:
Haddii ay ka badantahay 12 saacadood daahid ah, tusaale ahaan, wax ka badan 36 saacadood dhaaftay tan iyo aad qaadatay kaniiniga ugu dambeysay, marka kale kuma illaalsanid. U qaado kaniiniga sida ugu dhaqsiha badan ee aad xasuusatid, iyo ku qaado garoojada xiggo waqtiga caadiga ah. Joogtey inaad u qaadatid kaniiniyada sida caadiga ah, laakin waa inaad sidoo kale isticmaashaa ka hortaga uurka dheeraadka ah, sida kondhomka, ee 7 maalmood ee xiggo.

Haddii aad iloowday hal kaniini ama ka badan asbuuca koobaad ee aadna galmo samaysay asbuuca kahoreeya markaad iloowday kaniiiyada, waxaa laga yaabaa inaad uur qaaday. Waydii umulisadaada/dhakhtarka wixii talo ah.

Kawaran haddii aan leeyahay dhiig bax aan caadi aheyn?

Dhiig baxa aan caadiga aheyn waa caadi. Tani waxaa ku jiro calaameynta aan u baahneyn leenka, ama dhiisbaxa u eg qulqulka caadada qafiifka ah oo u baahan illaalo. Waxay sidoo kale noqon kartaa inaysan jirin dhiigbax gabi ahaanba. Dhiigbaxa aan caadiga aheyn ma ahan aastaanta illaalada lagu dhimay Vinelle. Guud ahaan, waxaad u baahantahay inaadan sameynin waxna laakin aaad sii joogteysid qaadashada Vinelle. Dhiig baxa wuu culusyahay oo muddo dheeraado, la xiriiri dhaqtarkaaga/umulisada.

Kawaran haddii aan qabo matag ama shuban?

Raac isla tilmaamaha sida kaniiniga la iloobay. Haddii aad qabtid mataga 3-4 saacadood gudahood kadib qaadashada kaniinigaaga iyo/ama shuban qabtay, waa suurtogal in jirkaaga aysan u suurtogalin inuu u qaato dhacaanka si sax ah. Haddii ay tani tahay xaalada waa inaad isticmaashaa illaalo dheeraad ah (sida kondhomka) oo hal isbuuc ah. Waa inaad sidoo kale sii joogteysaa inaad u qaadatid kaniiniyada si caadi ah.

Ka waran haddii aan qaadanayo daawo kale?

Marwalba u sheeg umulisadaada ama dhakhtarkaaga haddii aad qaadaneyso daawo kale. Qaadashada Vinelle oo lagu daray daawooyin kale waxay keeni kartaa in difaaceedu yaraado. Qaar ka mid ah qalajiyayaasha, daawada xanuunka qalalka, iyo sidoo kale daawo dhaqameedka St. John's Wort ayaa kamid ah tusaaleyaasha.

Ka waran haddii aan rabo inaan uur qaado?

Haddii aad rabtid inaad uur qaadid, jooji qaadashada Vinelle. Inta badan dumarka, ugxan sameynta way soo laabataa islamarkiiba kadib markii ay joojiyaan qaadashada kaniiniyadooda ka hortaga uurka. Laakin waxay sidoo kale qaadan kartaa waqti qaar, waxay ku xirantahay howsha gaarka ah ee ugxan sameynta. Niyada ku hau in dumarka oo dhan ee rabaan inay uur qaadaan waa inay ka fogaadaan tubaakada iyo qamriga oo qaataan dheeraadyada dhiiga soo celiya, tusaale ahaan Natalben Gravid (aqrin dheeraad ah bogga xiggo).

Saameynadee caafimaadka ayaan la kulmi karaa?

Saameynada caafimaadka caadiga ah ee dhici kartaa waxaa ku jiro dhiigbaxa aan caadiga aheyn, madax xanuun, finanka iyo/ama adkaanshaha naasaha. Niyad jabka, murugada iyo cayilka sidoo kale way dhici kartaa. Waxaa sidoo kale jiro saameynada caafimaadka taas oo marmar weli halis ah. Haddii aad la kulantid wax saameynada caafimaadka, gaar ahaan haddii ay dhab ka tahay ama sii dheeraado, ama haddii caafimaadkaaga isbadelo oo aad u moodo inay sabab u noqon karto Vinelle, la xiriir dhaqtar ama umuliso.

La xiriir dhaqtarkaaga islamarkaasba haddii aad la kulantid kuwa kamid ah aastaamaha xiggo:
Dhiig baxa lama filaanka ah ee ka imaanayo xubinta taranka, bararka lama filaanka ah ama xanuunka kubabka/lugaha, xabad xanuunka ama dhibaatada neefsashada, xanuunka lama filaanka ah ama daran ee xundhurta ama xundhurta hoose, haddii aad ka dareentid kuus naasaha ama haddii aad u maleyso inaad uur leedahay.

Haddii aad qabtid su'aalo kaloo dheeraad ah ama shaki kaaga jiro, la xiriir umulisadaada ama dhaqtarka. Wixii warbixin dheeraad ah aqri nuug-yaraha warbixinta bukaanka ee baakida ku jirto.

Bilow qaadashada soo celinta dhiiga haddii aad joojiso qaadashada kaniiniyada ka hortaga uurka iyo **aad rabtid inaad uur qaadid**

Soo celinta dhiiga waxay muhiim u tahay qeybta unuga caadiga ah iyo hormarka maskaxda iyo qeybta xididaha ee uurjiifka. Qaadasho aan ku filneyn ee soo celinta dhiiga waxay kordhin kartaa halista helista canuga leh cilada lafdhabarta. Maamulka Cuntada Qaranka Swedish iyo Guddiga Caafimaadka iyo Fayo qabka Qaranka ku taliyeen dheeraadka 400 garaamo ee soo celinta dhiiga maalin walba. Si loo gaaro saameynta saxda ah, waxaa fikrad wanaagsan ah in la bilaabo qiyaastii hal bil ka hor ka hortaga uurka.

Natalben Gravid waa kaniini nafaqo gaar ahaan loo soo saaray dumarka uurka ah ama qorsheynayo inay uur noqdaan.
Natalben Gravid wuxuu wataa soo celinta dhiiga oo firfricoon ee ay ka faa'idi karaan dumarka oo dhan, iyo birta, kiimiko, fitamiin D, omega-3 iyo 14 nafaqo oo si taxadar ah loogu doortay uurleyda. Dheeraadyada cuntada ma badesho cunto caafimaadan, laakin waa in lagu daraa cunto kala duwan oo dheelitiran iyo hab nololeed caafimaadan.

La hadal umulisadaada ama ka aqri wax badan
www.natalben.se

Vinelle (75 mikroogaraam desogestrel), kaniiniyada, kaniiniyada kahortaga uurka ee progestin. Daawooyin laguu qoro ee kaabista ah.
Waxa loo isticmaalo: Kahortaga uurka.
Digniinaha iyo xadidaadaha: Daraasaadka ayaa muujiyay xariir u dhexeeya deegsiga COC (COC yada ka kooban progestogen) iyo kor u kaca venous thromboembolism (venous thrombosis qoto dheer iyo dhiig xiranka wadnaha). Muhiimada caafimaad ee natiijadaan marka desogestrel loo qaato in looga hortago uurka ayadoon lagu darin maadada oestrogen lama garanaayo, laakiin waa in la joojiyaa daawada Vinelle haddii uu kugu dhaco thrombosis.
Ciladaha imaan kara: Madax xanuunka, isbadallada dareenka, doonista galmada oo hoos u dhacda, lalabo, finan, xanuunka naasaha, dhiigbax qayru caadi ah, inaan wax dhiig ah kaa imaan iyo cayilka.
Xogta kooban ee daawada oo la cusboonaysiiyay 29 Janaayo 2021. Si aad u hesho xog dheeraad ah iyo qiimayaasha, booqo www.fass.se. CampusPharma AB, www.campuspharma.se

C1575-5 2021-12

CampusPharma
Karl Gustavsgatan 1 A, 411 25 Gothenburg Sweden | Tel. +46 031-20 50 20 | info@campuspharma.se | **www.campuspharma.se**